Somali

# Xaashida Macluumaadka 2aad
# Waa Maxay Mashruuca Caymiska Iinta ee Qaraneed? (Mashruuca Caymiska Iinta Qaraneed)

**Xaashidan macluumaadka waxaa sameysay Qareenidda AMPARO Advocacy si ay u siiso dadka ka soojeeda bulshooyinka dhaqan ahaan iyo luqad ahaan kala duwan taasoo wadata macluumaad ku saabsan Mashruuca Caymiska Iinta ee Qaraneed.**

**Mashruuca Caymiska Iinta ee Qaraneed** waxaa loo yaqaan NDIS waana hab cusub oo looga caawiyo dadka qaba iinta siday u heli lahaayeen daryeelka iyo taageerada ay u baahan yihiin. Waa lacag la'aan, waana nadaam qaraneed sidaas darteed waa u-siman yihiin dadka Australia oo dhan. Waxaa laga heli doonaa waddanka oo dhan sannadka 2019, waxayna ka bilaaban doontaa qaybo Queensland ah 2016. Dadka qaba iinta kuwaas oo ka helaya taageero NDIS waxaa loo yaqaan "ka-qaybgalayaal".

## Xaq-u-yeelashada

**Habkan NDIS waxaa loogu talagalay dadka qaba iinta kuwaas oo ku nool Australia oo-**

- Ka-yar da'da 65 sano marka kowaad oo ay helayaan NDIS
- Ah muwaadin Australia **AMA** a dagane joogto ah, **AMA** ah muwaadin New Zealand ah kaas oo ah haysteyaasha Fiisada Qaybta Gaarka ah oo Ilaalsan
- Qaba iin aan ka baxayn, oo ah "nolosha oo dhan" saamaysana awooddooda inay ka qaybgalaan howlaha maalin kasta socda.

Dadka aan xaqa u lahayn, NDIS waxay ku xiri kartaa taageerooyinka kale ee ku habboon inay helaan.

## Doorashada iyo Maamulka



Waagii hore, dad badan oo qaba iinta Australia dhexdeeda waxay badanaa dareemi jireen in laga dhexsaaray nolosha bulshada, ayna leeyihiin doorasho yar ee sida loo siiyo taageerada. Habkan NDIS, ka-qaybgalayaashu waxay go'aansan karaan taageerooyinka ay doonayaan iyo siday u heli karaan.

## Taageerada Macquulka ah oo Lagama Maarmaanka ah

Habkan NDIS ayaa bixin doona traageerada la xiriirta iinta, haddii loo baahdo, waxayn ka caawin doontaa qofka inuu gaaro hadafyadiisa iyo riyooyinkiisa, waxayna ku caawisaa dadka si ay u noqdaan kuwo madaxbannaan.



**Habka NDIS wuxuu bixiyaa taageerada dadka uga baahan yihiin si ay qayb uga noqdaan nolosha bulshadeed iyo dhaqaaleed ee bulshadeeda.** Taas waxaa ka mid noqon karta-

- Samaynta xiriirada iyo dareenada ku xiran dadka kale – oo ah la jiridda qoyska iyo saaxiibada.
- Ka-qaybgalka bulshada iyo howlaha ijtimaajiga ah – oo ay ku jiraan howlaha waqti-firaaqada ah
- Aadidda dugsiga, waxbarashada iyo tababar qaadashada – sida waxbarashada TAFE-ka iyo Jaamacadda
- Howlaha nolol maalmeedka guud – sida samaynta go'aannada, bixinta biilasha, iyo xallinta dhibaatooyinka
- Wada-xiriirka – sida la xiriiridda iyo fahmidda dadka kale
- Dhaqdhaqaaqa – sida ku dhex-socoshada gurigaaga iyo bulshada, ama helidda qalabka ama caawiyeyaasha lagu sameeyo sidaas
- Daryeelka nafsiga iyo baahiyaha daryeelka-caafimaad ee gaarka ah – sida ku-caawinta qubayska, labisashada iyo cunto cunidda
- Howlaha guriga – sida diyaarinta cuntada iyo nadiifinta guriga
- Shaqo-helidda – sida raadinta ama haysashada shaqada

## Waxaysan NDIS maalgelinayn

habka NDIS ma maalgelin doonto wax kasta oo-

- aan la xiriirin iinta qofka
- la xiriira qarashyada nolol maalmeedka kuwaas oo aan la xiriirin baahiyaha taageero ee qofkaas
- ay tahay inay maalgeliso haya'd kale, sida waxbarashada, caafimaadka ama guri-siinta
- waxyeelo u keeni kara ka-qaybgalaha ama dadka kale.



## Carruurta qabta iinta

Habka NDIS wuxuu kaloo kugu caawin karaa helidda taageero hore ee ilmaha qaba iinta. Taageerada hore waxay gacan ka gaysan kartaa inay yarayso saamaynta iinta ee muddada dheer ah ay saamaynayso adiga iyo ilmahaaga. NDIS waxay ugu yeertaa arintaas "Soo-dhexgelidda Hore".

## Dadka qaba iinta iyo qoysaskooda

Baahiyaha dadka qaba iinta, oo ay ku jiraan kala doorashadooda iyo go'aanadooda waxay udub dhexaad u tahay samaynta qorshaha ee NDIS si loo taageero, hase ahaatee kaalinta qoysaska ayaa kaloo muhiim ah.

Dadka qaba iimaha waxay ku casuumi karaan qoyska iyo taageerayaasha kale inay ku caawiyaan habka qorshaynta NDIS. Qorsheeyeyaalka NDIS waxay ka fakarayaan wax ku saabsan siyaabaha oo ay qoyska loo caawiyo si loo siiyo taageero joogto ah waxayna tixgelin doonaan kaalinta qoyska markii ay usamaynayaan qorsheyaasha ka-qaybgalayaasha, oo ay ku jiraan taageerada ay siiyaan, masuuliyadaha kale, iyo qorsheyaasha noloshooda. Qorsheeyeyaasha NDIS waxay kaloo tixgelin siin doonaan in dadka qaba iintu ay u doonayaan taageerada qoyska si ay u sameeyaan go'aano wargashan, ayna u qiimeeyaan aragtiyadooda, aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda.

## Haddii aad u baahan tahay turjumaan

Haddii aad u baahan tahay turjumaan si aad su'aalo u weydiiso ama aad wax badan u ogaato, ka wac TIS taleefanka 131 450 waxaadna ka codsataa in lagugu xiro Mashruuca Caymiska Iinta Qaraneed, 1800 800 110.

# Sida loo ogaado haddii aad xaq-u-leedahay

Waxaad adeegsan kartaa liiska-hubinta ee NDIS Access si aad u aragto inaad xaq u leedahay inaad hesho caawimaada laga helo NDIS. http://www.ndis.gov.au/ndis-access-checklist

Markii NDIS ka bilaabato Queensland, dadka qaba iinta waxay awoodi doonaan inay buuxiyaan foomka"Access Request Form". Foomkaas wuxuu siin doona NDIS macluumaad ay ku go'aamiso bal inaad ka heli doonto taageero NDIS. Foomka korkiisa Waxaad u baahan doontaa inaad ku sheegto macluumaadka ku saabsan iintaada, da'daada iyo muwaadinimadaada/deganaanshahaaga Australia. Koobiyada foomka iyo nooca macluumaadka iyo dokumantiyada aad u baahan tahay inaad keento si aad u xoojiso codsigaaga (tus. *Caddaynta iinta, deganaanshaha, da'da* iwm) waxaa laga heli karaa website-ka NDIS (ka hoosaysa qaybta Ka-qaybgalayaasha).

# Sii-qorshaynta Hore

Dadku waxay sii bilaabi karaan ka-fakaridda iyo qrshaynta hadda wax ku saabsan siday u doonayaan inay u noolaadaan noloshooda iyo caawimaadda ay u baahan doonaan si ay sidaas u sameeyaan. Waxaa jira workbook qorshaynta NDIS kaas oo dadku soo buuxin doonaan si uu ugu caawiyo inay u diyaargaroobaan habka qorshaynta. Koobiyada workbook waxaa laga heli karaa website-ka NDIS. Kaas waxaa lagu turjumey luqadaha soo-socda – Isbaanishka, Fiyatnaamiiska, Carabiga, Giriiga, Talyaaniga, iyo Shiinayskii hore oo la fududeeyey.

# La-shaqaynta Qorsheeyaha NDIS

Markii laguu soo-sheego inaad xaq u leedahay NDIS Waxaad heli doontaa xidhmada qorshaynta. Xidhmada qorshaynta waxay fasiraysaa qorshaynta iyo habka qiimaynta waxaana ka mid ah caddaynta ka-qaybgalaha taas oo ay tahay in la soo buuxiyo ka-hor qorshaynta iyo habka qiimaynta. Haddii dadku u baahadaan caawimaad sida turjumaanka ama waxyaalo turjuman, NDIS waxay ka caawin kartaa u-samaynta arimahaas. Waxaad kaloo codsan kartaa in waxyaalaha laguu turjumo haddii aad uga baahan tahay kulannadaas.

Waxaa jiri doonaa habab kala duwan oo aad u samayn karto qorshahaaga NDIS, oo ay ka mid yihiin la-kulmidda qorsheeyaha NDIS. NDIS waxay kugu caawinaysaa inaad ka hadasho baahiyahaaga, hadafyadaada iyo damacyadaada iyo taageerada aad hadda hesho. Tani waxay qaadan kartaa wax ka badan hal sheeko waxaadna soo wadan kartaa qof ku taageera. Haddaba adeegsiga macluumaadkan, NDIS ka dib waxay samayn kartaa qorshe taageero kaas oo sida ugu fiican u kaafinaya baahiyahaaga iyo hadafyadaada. Waxaad casuumi kartaa dadka kale si ay u taageeraan oo ay kuu caawiyaan inta lagu jiro habka qorshaynta.

Wixii macluumaad dheeraad ah www.ndis.gov.au

**Macluumaadkan waxaa sameeyey AMPARO Advocacy Inc.**

In kastoo dadaal kasta lagu bixiyey si loo hubiyo inuu sax yahay waqtiga la daabacayo, qoraalkan waxaa loogu talagalay inuu bixiyo xog guud hase ahaatee waxaa laga yaabaa inuusan sax ahayn, cusbayn ama uusan ku dhammayn xaaladdaada. Talooyinka shaqsiyeed oo dheeraad ah ayaa aad loogu talinayaa.